# Guurka Minnesota

Marriage in Minnesota

## Sidee ayaan ugu guursan karaa Minnesota?

Si aad si sharci ah ugu guursato Minnesota waa in aad codsataa ogolaashaha (leesinka.) Ma ay quseeyso tani midda ay tahay degmadda aad ka heshay warqadadda guurka marba haddii uu guurka ka dhacay Minnesota. Guurka waana in uu guurka sameeyaa qof u heysta ogolaasho sharci ah. Ka dib waxaa lagu siinayaa shahaadada guurka oo cadeyneysa in aad si sharci ah isu qabtaan.

Waxaa Mareykanka la ogolaaday in dadka isku jinsiga ah is guursan karaan.

Ma waxa aad tahay qof xaas ah ama aan heysan warqadaha sharciga ah ee wadanka? Waxaa lagaa doonayaa in aad ogaato waxyaabo kale. Akhri xogta urursan ee *Guurka iyo Furiinka Muhaajiriinta reer Minnesota* and *Muhaajiriinta aan Sharciga Lahayni ma ku Guursan Karaan Minnesota?*

## Waa maxay da'da shargigu ogol yahay in lagu guursan karo Minnesota?

- Waa inaad 18 sanno jir tahay aadna awoodo inaad gaari karto go'aanadaada si aad si sharci ah ugu guursato Minnesota.
- Minnesota ma aqoonsato guurarka dadka aan qaan-gaarka ahayn ee u socdaala dibada gobolka si ay u guursadaan.



## Waa maxay guurka aan la ogoleyn Minnesota?

- Haddii aad dooneyso in aad guursato waa in aadan qof kale xaas/say aadan u aheyn.
- Haddii aad horay u guursatay waa in aad heysataa furiin **sharci** ah oo xaaskii/saygii hore. Furiin sharci ah waa midka la raaco sharciyada gobolka halka uu ka dhacayo furiinka oo qaali uu saxiixaa ka hor inta aanu noqon mid sharci ah. Gobolka Minnesota, furiinku waa inuu ka soo baxaa maxkamadda oo qaali saxiixaa ka hor inta aanu noqon furiin sharci ah.
- Minnesota lama ogola dadka ehelka isu ah qaarkood in ay is guursadaaan:  Ma guursan kartid:
  - Ilmaha aad dhashay ama aad korsatay.
  - Ilmaha ay dhaleen ilmo aad dhashay ama aad korsatay.
  - Ilmaha ay dhaleen walaalahaa haddii ay yihiin kuwo aad wada dhalateen.

– Ilmo adeerka/abtiga koowaad Ilma adeerka/abtiga koowaad waa caruurta ay dhaleen eedooyinka ama adeerada wada dhashay.

## Halkee ayaan ka codsan karaa ogolaashaha?

Si aad ugu guursato Minnesota waxa aad codsaneysaa ogolaashaha. Leesinka waxa aad ka codsan kartaa degmo kasta. Waajib kuguma aha in aad codsato degmada aad dooneyso in aad u guursato. Maadaama ay degmooyinku kala duwan yihiin, la xiriir xaarunta ogolaashaha ee degaanka si aad u ogaato halka aad ka codsaneyso. Weydii haddii degmada aad degan tahay ay ku siin karaan macluumaad guud oo ku saabsan ama ka raadso internetka xarunta leesinada ee degaanka si aad u ogaato.

Degmooyinka qaarkood waxaa laga yaabaa in aad foomamka ka daabacan karto barta internetka. Qaarkoodna waxa aad codsiga ku soo gudbin kartaa barta internetka. Booqo bogga internka ee degmada.

Waa in aad si wadajir ah u codsataan ogolaashaha guurka (leesinka) Haddii ay dhacdo in aydan wada tagi karin, weydii xarunta leesinada waxyaabaha lagaa doonayo si aad u codsataan leesinka.

## Waa imisa qiimaha ogolaashaha guurka?

Codsiga leesinka guurka waa $115. Haddii aad qaadato ugu yaraan 12 saacadood oo fasal guurka ka hor ah, lacagta leesinka waa $40. Waa in aad fasalka ka qaadataa:

- Kaniisad ama hay'ad u heysata ogolaasho.
- Qof ogolaasho u heysta inuu samyn karo guurka madaniga ah.
- Qof ogolaasho u heysta la talinta guurka iyo qoyska.



Kala tasho sheekha ama ka raadso barta internetka la taliyaha qoyska. Weydii qiimaha ka hor inta aadan iska diiwaan gelin.

Waxaa lagaa doonayaa cadeyn in aad fasalka qaadatay. Qofkabixinaya fasalka waa inuu hayaa foomamka muhimka ah ama erayada cadeynaya in aad fasalka qaadatay. Foomka ama warqadda waa in la soo mariyaa nootaayada. Horey u soo qaado marka aad codsaneyso ogolaashaha (leesinka).

## Waa maxay macluumaadka aan u baahanahay si aan u codsado ogolaashaha guurka?

- Magacyadda oo buuxa
- Lambarada Sooshal Sakuuratiga (Social Security). Haddii aadan haysan lambar Sooshal Sakuurti (Social Security) ah oo ansax ah, waa khasab inaad sheegto inaadan haysan mid.
- Cinwaanada / Degmadda aad degan tahay
- Cadeyn da'aha ah / Taariikhaha dhalashada
- Aqoonsi sawir leh (leesinka wadida gawaarida, kaarka aqoonsiga gobolka, baasaboor)

- Haddii aad dooneyso in aad magacaaga bedesho guurka ka dib, magaca aad dooneyso in aad la baxdo.
- Haddii aad horey u guursatay, waxa aad u baahan tahay akhbaar ku saabsan xilihii ugu dambeeyey ee aad is qabi jirteen. Akhbaar ah sidda: goorta iyo meesha furiinka guurkaa ama, haddii uu xilahaagii hore uu dhintay, taariikhda iyo goobta dhimashada.
- Xiriirka idinka dhexeeye haddii uu jiro wada dhalasho ama koritaan,
- Haddii uu jiro xiriir.
- Ciwaanka meesha aad doonayso in nuqulka (copy) sugan ee warqadda nikaaxa laguugu soo diro ka dib kolka la diiwaangeliyo guurka.

## Magac Bedelidyada

Hadii aad rabtid inaad bedesho qaar ama dhamaan magacyadaadda oo dhan, waa aad ku sameyn kartaa taa codsigaaga warqada nikaaxa. Haddii aad go'aansato inaad sameyso magac bedelid ka dib kolka aad guursato, taa waxa aad ka sameyn kartaa uun maxkamadaha.

Haddii lagaaga helay dambi weyn ee kabaa'ir ah (felony) gobol wadanka ka mid ah aadna doonayso inaad bedesho magacaaga kolka aad guursato, waxaa jira foom kale oo siyaado ah oo aad u baahan tahay inaad sameyso ka hor inaadan helin warqada nikaaxa. Ka hubi xeer-ilaaliyaha degmadda habka iyo sida lagu helo foomka. Xeer-ilaaliyaha degmaddu waxa uu haystaa 30-cisho oo uu uga mudici karo magac bedelidaada. Kolkaa, hubi inaad arintan sameyso 30-cisho ka hor kolka aad qorshaynayso inaad codsiga warqada nikaaxa aad geyso degmadda.



## Muddo intee le'eg ayaan sugi helida warqada nixkaada?

Ma jiraan hadda wixii ka dambeeya muddo ay tahay in la sugo warqada nikaaxa. Badanaa, waxa aad qabsan balanta aad ku tagto xafiiska warqada, waxa aad heli doontaa warqadda nikaaxa ka dib kolka dhaarta aad marto. Dhaarta waxaa la yaabaa in iyadoo la wada joogo lagu dhaariyo, ama lagugu dhaariyo telefan ama kumbuyuutar. Waxa ay kaloo noqon kartaa dhaartu oraah ansax ah oo ay saxiixaan labadda qofba oo ay ku dhaaranayaan in guurku sharci yahay. Codsiyadda warqadda guurka madaniga ah ee ay saxiixaan labada qofkaba waxaa lagu soo diri karaa boostadda, faaxsi ahaan, ama waxaa lagu soo xareyn karaa kumbuyuutarka.

## Marka aan helo ogolaashaha, waqti intee le'eg ayaan heystaa si aan u guursado?

Waxa aad heysataa 6 bilood ka bilaabata taariikhda ogolaashaha guurka in aad ku guursato. Haddii aadan ku guursan 6 bilood gudahood, waa in aad dib u codsataa.

Haddii aadan ku guursan 6 bilood gudahood xanuun dartii ama dhibaato weyn oo dhacday, waxaa laga yaabaa in lacagta lagaa daayo.  Weydii xafiiska degmada.

## Yaa isu kaaya guurin kara?

Ka dib kolkaa aad hesho warqadda guurkaaga, waxaa ku guursan kara qof ugu yaraan jira 21 sanno waxaadna u diiwaangelin kartaa guurkaa siddi guur madani ah oo kale oo uu sameeyey wadaad ka diiwaangashan degmo walba oo Minnesota ah. Warqadda guurka waa khasab in lagu daro wadaadka degmadda idantay kolka la diiwaangelinayo.

Haddii aad dooneyso in ay isu kiin guuriyaan saraakisha maxkamadda (qaali), la xiriir degmada si aad u heshaan macluumaad arrintaas ku saabsan. Waxa aad ka heli kartaa halka aad kala xiriireyso degmo kasta [www.mncourts.gov](http://www.mncourts.gov). Guji "Find Courts" kolkaa "District (Trial) Courts"oo ka dooro degmadaada.

## Xagee ayaa xafladda lagu qabanayaa?

Haddii aad ogolaashaha ka codsatay Minnesota, xafladda guurka waa in lagu qabtaa Minnesota.


## Ma jiraan nidaam oo degsan oo la raaco xafladda guurka?

Xafladda meherka, adiga iyo qofka aad gursanaysaa waa khasab inaad tiraahdaan in labadiinu aad doonaysaan inaad xilo isu noqotaan. Taasi waxay u baahan tahay inay ka dhacdo horta wadaadka iyo 2 qof oo makhraatiyaal. Goob joogayaasha waa in da'doodu ka weyn tahay 16 sano jir. Waa in ay saxiixaan shahaadada si ay uga marag kacaan in ay goobjoog ka ahaayeen.

Haddii uu xafladda qabtay qof xagga diinta ka socda, xafladda waa in loo qabtaa hab waafaqsan sida ay diintaadu qabto.

Haddii uu xafladda qabto qaali, maamulaha maxkamadda, ama dad kale oo aan aheyn wadaadada diinta, waa in aad cadeysaa in qofka aad u noqoneyso xaas, say ama dad wada nool xilli ka mid ah inta ay xafladdu socoto.

## Maxaa dhacaya xafladda ka dib?



Xafladda ka dib, qofka xafladda qabtay waxaa laga doonayaa inuu muddo 5 cisho ah shahaadada ugu soo diro degmada aad ka codsatay ogolaashaha. Degmada ayaa diiwaangelisa guurka oo kuu soo dirta shahaadada guurka ee leh shaaabadda degmada.

Haddii aad magacaaga bedeshay, waa in aad saxdaa dhamaan diiwaanka uu ku qoran yahay magacaagii hore.  Taas waxaa ka mid ah in aad codsato kaarka lambarka bulshada, bangiyada, goobta shaqada, leesinka wadida gaadiidka ama aqoonsiga gobolka.  Waa in aad la xiriirtaa mid kasta oo ka mid ah xafiisyada si aad u ogaato waxa lagaa doonayo.

***Xog Ururan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan ururan haddii ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**